


Zama waa mid aad u wanaagsan!

 Michael Oguttu

 Vusi Malindi

 Abdi Muse

 2

 Soomaali so



Walaalkeyga yar wuxuu seexdaa waqti dambe. Anigu waxaan soo toosaa xilli hore, maxaa yeelay waa mid aad u wanaagsan!



Anigu waxaan ahay kan qorraxda soo bixiyo.



“Waxaad tahay xiddigta subaxdayda,” ayuu yidhi Mama.




Anigu waan maydhaa, ma u baahni wax caawin ah.



Waxaan u dul qaadan karaa biyo qabow iyo saabuun shiirayso oo buluug ah.



Mama aya i xasuusiyo, “Ha iloobin ilkaha.”
Waxaan ku jawaabaa, “Marnaba, aniga ma
ihi!”



Ka dib markii aan maydho, waxaan salaamaa awoowe iyo eedo, oo waxaan u rajeeyaa ayaga maalin wanaagsan.




Dabadeedna waan labistaa, "hadda waan weynahay Mama," ayaan dhahaa.




Waxaan xidhi karaaguluusyadeeyda iyo
suunka kabahayga.



Waxaan na hubiyaa in walaalkeyga yar uu yaqaano dhamaan wararka iskuulka.



Fasalka dhexdiisa waxaan ku dadaalayaa sida ugu fiican.



Waxyaabahan wanaagsan oo dhan waxaan sameeyaa maalin kasta. Laakiin waxa aan ugu jeclahay, waa in aan ciyaaro oo aan ciyaaro!



Global Storybooks

globalstorybooks.net

Zama waa mid aad u wanaagsan!

 Michael Oguttu

 Vusi Malindi

 Abdi Muse

